

Gabyga: DALEEL HOGAD Curiye: abwaan Maxamad Xaseen Faarax



Gabyga: DALEEL HOGAD Deelleyda gabay waayadaan, waanigaan deyineWaataan dayrtiyo gu'giyo, dawyadaan marineDibnahayga waataan ka jaray, dihashadeediyeHa yeshee, markaan daa iraa, een dhegaha duubtoDawan qaylo dheer iyo waxbaa, ii durbaan tuma'eMarkaasaan sidii aar dib jirey, oo wax dilanaayaDaf la soo iraaahdaa hamuun, daal anoon qabineCaawana waxbey derrinayee, balaan daliigeeyo. Bashirow dabuubtaadi gabay, daalacdo helayeDayixiyo daruuraha socdiyo, dirirku ii keenyeSida aad u daabtana murtida, waan ku diirsadayeDamqashadana waan kula qabaa, diilalyada ciileMarka xigana daldalooladiyo, daayacaad aragtayWax dahaaran maahoo iyana, wayska dibadyaaleHa yeeshee, haddii aan u dego, doodda hadafkeygaWaano la ma dabooliyo digniin, duul la fahamsiineAan dillaacsho xaajada dellegan, ee is dabataalla. Dabaan iga horreeyiyo intaan, daawasho u jooqeySiyaasadda dalkeenaan marnaba, guul ma ay degineMar ha oo dugsado deyr qabiil, iyo duqoow beel'eMarna dirir sokeeyiyo dirsooc, door ha loo bido'eMarna duul ha loo dawdawshoo, duur ha loo tubo'eMarna ururro dabandebayo, koox ha doobido'eMarna degaan ha loo kala xirtiyo, degelka ciideedeMarna xisbi ha loo kala didiyo, dowlad goboleedeMarna dibad ha loo aado shirar, duullimaad badaneMar kastaba ka daranbay ahayd, tii damboo timideWaxa ay heshiis daawo nabad, jeer u dihanwayseyDanta guud ma doonayso iyo, daacadda ILAAHEWaa daaman raac uu hunguri, hagayo daahiileHalka ay u sii daadegtana, waa dalqo calooleWaxay deris wadaagaanna waa, doollar lacageedeIsku duubni wadareedna wow, dabiyo baasiineHa ku daalin saaxiib arrini, waa DALEEL HOGADE.Duqayntii Bariirana haddaan, doodyar ka iraahtoMarrastii la diley iyo dadkii, dulumka loo laayeyDa'yar canuga, oday duqa wixii, mayd is darafyiileyKuwa aad farriimaha u diri, eed u dano sheeganDuurjoogta ugama ay duwana, deeradiyo cawleJirna u ma dibaaxshaan haddii, kuman la duugaayeSidaas iyo daraaddeed markaan, dulucda kuu taabtoDalka iyo dadkiyo diinta iyo dowladnimadeennaDulya hoos, doc iyo daafihiyo, daaqil iyo dibadbaBashirow rag daafaca marnaba, nooma doorrana'eSoomaalina dulleeystaa kor kaca, daa'in abidkeedeMaantana digdiga weeyeye iyo, deedan dibuguureAnna dhiillo dihan i la ma ahan, dooddis waalliduyeDammaniyo dabbaalkaan ogayn, loo durbaantum'eSidii dibidi, kala duwani midab, loogu dawgelayeyMarkii laysku keendiray misana, layna kala daadsheyDuulba meel in lagu dabarjarayo, wow dareen qabayeHa ku daalin saaxiib arrini, waa DALEEL HOGADE. Afartaas dawaaraye haddii, aan xug kale deexoMa daaloow Galayrow abwaan, gabagi aad duubtayMurtidaad dubaysiyo sidaad, diiradda u saartayMid ka durugan taadii anoon, soo didimo dooninWaxaan hoosba loo deyin hadii, aan ka rogo daahaNin degaanadiisii mar hore, loo dawarid dhoofayOo dalagle loo hoostegoo, gacanta loo doogteyOo dagaagi uu caawin jirey, soo dulbaax celiyeyOo dagagartuu soo dirsaday, duub la wada saartayOo dalkugalkiisii sharciga, jeeb dambe u yaalloOo haddeerna deeq iyo anfaco, laga danaynaayoWuxuu diliyo, wixii uu daqriyo, wuxuu duqaynaayoWuxuu dumiyo, wuxuu daadiyiyo, wuxuu dafoo qaatoWuxuu dumo, wuxuu kala dirayo, wuxuu iskii daayoWuxuu duro, wuxuu dawdariyo, eed la daba joogoWax u diidayaan jirin dhammaan, toow isagu doono. Inay taasi deel runa tahana, waxaw daliisheed ahDabre orodka, duullaan daflaha, weeran dalandoolkaDardargelinta, daandaansiyada, kibir damaashaadkaDil hamuumka, doolalo dheer, dooxatayn wadidaDadban leexa, dibindaabyadaa, dhinac darraabayntaDayac iyo, dagniin eegadkiyo, gaadmo dawacayntaDigta iyo damtiyo deedankiyo, daacdarrada joogtoNaga daa dad dhihi kara haddii, uu danni ogaadoDukundaakun ka ma uu dhigeen, daaqsatoy shacabeSidaanna u ma duqeeyen wallee, beeraleey deriseDhiirrida wuxuu ugu daldalay, gumuca deeleeysanDowladdeen kuwaan moodnabaa, dooyo sahaniisa.Dabadhilif iney wada yihiin, ducufu iimaan ahMisna gumaysi daaqili yihiin, waxaw daliisheedaDabdaboolka, dembiyaduu gelaba, ee ka sii dariddaAf dabayl, duddumo fuuliddiyo, dood is garabyaacaRun dafiridda, been daabiciyo, hubanti daahsaarkaDinnaahyaynta, daacdaasiyiyo, digasho geegaarkaDuurxul hadalka, deelqaafka ba'an, sii dardaarwerinta. Afartaana diyaarshoo warbixin, duubay oo dhigayeBeen inaanan daabulin haddii, aan dadka u sheegoBal dayaay dubaaqadaa dhacdiyo, diirrimaad li' idaBal dayaay kuwaan doorrannaba, dabacsanaantoodaBal dayaay damiir xumida iyo, wada diciifnaantaBal dayaay macnihi dowladnimo, dawga lagu leexsheyBal dayaay qabiil degeshigiyo, qaran daryeellaantaBal dayaay dalluuntii darraad, dibugu sii guurkaBal dayaay waxyaabahan dahiray, ee is dacalyaallaBal dayaay, haddana sii dayaay, waxa dalkii yaalla.Afartaana diyaarshoo warbixin, duubay oo dhigayeXaqdarrada dadkii lagu dilee, dulumka loo laayeyNinka yiri garbaa loo deldelay, waana cadaw dowloOo daxasha uurkiisa taal, daahan kari waayeyDulka xaasidkaa doydarkaa, waxaan dareensiiyey; Adigiyo kuwaan uu duqayn, doofirlaha gaalkuDirka dhalasho wow

simantihiin, diirka oogadayeIyaguna dembiyo gaara iyo, daanno u ma gaysanAdigana dux iyo daawo kale, kuu ma daadihininMidba dubo habeen weeye iyo, kala dambeysiineWuxuu kuu dib dhigayaana waa, yey dhammaan didinGoortuu daleel kaa helana, waa ku dacayeyneMid labaad haddaan kuugu daro, oo daliil culus ahDamacyada gumeystahana aan, kaaga rogo diirkaHadduu diriro, duul uu in badan, dabin la gaadaayeyDabargoyin, isagoo ugu danliyo, daanno iyo laysmoMid inuu dannaano u xigsado, waa dabciyadiisaIska daramaraac jeer dambuu, daabad kaa dhigane. Mahmaah kale haddan kuugu daro, xugana kuu deexoDuunyadaada adigoo midnaba, cunid ka daayayninDuhur qura ma wada dooxdid sida, daacufaha weereMid walbaba markii aad dantaad, daabax qalataayeMisna doogga iyo daaqa waad, ugu dadaashaayeMeeshii duraaw roob marana, waad u dadabtaayeGumaystana cidduu daga sidii, duunyadu dhaqayeHa degdegine duulow ogow, dhagartu kuu duugi. Digniin kale haddaan kuugu daro, ka ma dambeys waanoDirgatada adduunyadu qofyohow, waa dawaaf socodeDugsi lagu yaqaanniyo daleed, ama dariiq toonaMa degtee illaa daa'in weys, daba wareegtaayeHadday maanta darar kuu listee, diiqo kagu sooortoBerribeey doc kale kaa martaa, kuna duruufaaMarkaasay midey dabartay shalay, diifna ku illowdeyWuxuu rabo u kala daadisaa, dabaqna saartaayeDabadeedna iyadoon u digin, bay ka dumisaayeQof walbow dantaa garo misana, duugga wax u reebo. Dhammaad.Agosto, 2017 **Curiye:**
abwaan Maxamad Xaseen Faarax